# CASUMAAD KU SOCOTA ILMAHAAGA OO KHUSEYSA KA QAYBGALKA DARAASAD KU SAABSAN DOORKA CARRUURTU KU LEEDAHAY FAAFITAANKA FAYRUS KOROONA AH OO CUSUB (SARS-COV-2) MARKAY JOOGAAN XANNAANOOYINKA IYO ISKUULLADA?

## XOG KOOBAN OO KU SAABSAN DARAASADDA

- Daraasaddu waxay eegaysaa doorka carruurtu ku leedahay faafitaanka fayrus koroona ah oo cusub markay joogaan xannaanooyinka iyo iskuullada (fasallada 1 ilaa 7), tirada qaada fayrusta, tirada qaaday ee calaamado dareenta iyo nooca calamadaha ay dareemeen.
- Daraasadda waxa laga helayaa aqoon qiimo leh oo gundhig u noqon karta talo-siinta iyo tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka ee laga fulinayo xannaanooyinka iyo iskuullada
- Muddada ka warhayntu waxay soconaysaa ilaa 10 maalmood
- Daraasaddu waxay ka koobantahay tahay in ilmaahaaga laga qaado labo tijaabo oo candhuuf ah muddada la socoshada
- Tijaabooyinka la qaado waxa loo baadhayaa sida ugu dhakhsaha badan si loo eego in ilmahaagu qabo infekshanka fayrusta koroonada, isla markaana waxannu idin la wadaagi doonnaa jawaabta tijaabada marka aannu helno natiijada
- Waxannu adigana kaa codsan doonnaa, adigoo u hadlaya ilmaha, inaad ka jawaabto foom-su'aaleed kooban oo khuseeya calaamadaha aad aragtay bilowgii iyo dhammaadkii muddada ka warhaynta oo aad isla markaana maalin-maalin u qorto calaamadaha aad aragto

## MACLUUMAAD KU SAABSAN DARAASADDA

Fayrus cusub oo koroona ah (SARS-COV-2) oo keenta xannuunka covid-19 ayaa ku faaftay dunida oo dhan, xataa Noorway. Waxa weli jira waxyaalo badan oo aan laga ogayn fayrusta iyo xannuunka. Qoraalkani waa casuumaad ku socota adiga oo metelaya ilmahaaga oo ku saabsan ka qaybgalka daraasad uu fulinayo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu. Daraasaddu waxay eegaysaa doorka carruurtu ku leedahay faafitaanka fayrus koroona ah oo cusub iyadoo la eegayo qaadista fayrusta ee aa jirta xannaanooyinka iyo iskuullada (fasallada 1 ilaa 7). Daraasaddo kale ayaa muujiyey in ay jirto is-qaadsiin ka timaada ama u dhaxaysa carruurta, laakiin ma muuqato in carruurtu door weyn ku leeyihiin faafitaanka fayrusta. Caadi ahaan carruurta intooda badan ma dareemaan calaamado ama waxa ku yimaada calaamado khafiif ah, isla markaana waxaan la hubin inta uu leegyahay faafitaanka ka imanaya carruurtaas. Taas darteed waxa loo baahanyahay in aqoon dheeraad ah loo yeesho arrintaas.

Halkan Noorway waxa dhammaan xannaanooyinka iyo iskuullada la xidhay 13-kii Maarso 2020. Wixii ka dambeeyey 20-kii Abriil 2020 waxa si tartiib-tartiib ah dib loo furay xannaanooyinkii iyo iskuullada iyagoo raacaya tallaabooyin adag oo ku saaban ka hortag faafitaan, oo ay ka mid yihiin kordhinta kala durugga dadka iyo

talloobooyin ku saabsan nadaafadda. In la fahmo doorka carruurtu ku leedahay faafitaanka fayrusta ayaa muhiim u ah talo-siinta iyo tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka ee laga fulinayo xannaanooyinka iyo iskuullada.

Daraasaddu waxay baadhaysaa:

- Tirada dadka ee qaaday fayrusta, tirada qaaday ee calaamado dareenta iyo nooca calamadaha ay dareemeen
- Arrimaha kordhiya halista qaadista fayrusta koroonada
- Tirada qaaday fayrusta ee haddana dareentay xanuun wata calaamado iyo heerka darnaanta infekshanka
- Inuu farqi u dhexeeyo faafitaanka ka dhaca xannaanooyinka iyo iskuullada marka ay jiraan iyo marka aanay jirin dad waaweyn oo laga helay covid-19
- In fayrusta ku jirta dadka laga helay covid-19 ee isku xannaano ama iskuul ah ay ka simantahay hiddaha, iyo in farqi u dhexeeyo fayrusyada laga helo iskuullada iyo xannaanooyinka kala duwan
- In madooyinka lid-ka ah laga heli karo candhuufta dadka qaaday fayrusta koroonada ee cusub

## YAA KA QAYBGELI KARA DARAASADDA?

Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa uu dhakhtarka guud ee xaafadda ama degmada aad degantahay ka helay warbixin ku saabsan in covid-19 laga helay hal ama dhowr carruur ah oo aada xannaada ama iskuulka (fasallada 1 ilaa 7) ee ilmahaaga. Waxannu ilmahaaga ka codsanaynaa ka qaybgalka daraasadan waayo isaga/iyada waxa ku dhici karayey covid-19 oo taas darteed waxa loo arkaa inuu yahay u dhawaade.

## MUXUU KA KOOBANYAHAY KA QAYBGALKA DARAASADDU?

Haddii aad ogolaato in ilmahaagu ka qaybgalo daraasadda waxannu isaga/iyada la socon doonaa ilaa 10 maalmood (waxaad heli doontaa jawaab). Waxannu kaa codsan doonnaa inaad foom-su'aaleed kooban buuxiso maalinta u horaysa (maalin 0) iyo maalinta u dambaysa muddada ka warhaynta. Halkaas waxa lagaa codsan doonaa inaad ku buuxiso macluumaad ku saabsan caafimaadka guud ee ilmaha iyo calaamadaha infekshanka ee jira. Ka jawaabista foom-su'aaleedyadu waxay qaadanayaan 5-10 daqiiqo. Isla markaana waxannu kaa codsan doonnaa inaad qorto calaamadaha aad ku aragto ilmahaaga dhammaan muddada ka warhaynta (ilaa maalmood, ka yar 5 daqiiqo maalintii). Ururinta xogta waxa la doorbiday in loo sameeyo hab elektoroonig ah adigoo isticmaalaya nidaam amaan ah oo aad ku galayso BankID. Waxa laguu soo dirayaa farrin SMS ah oo wadata cinwaanka lagu galayo. Waad dooran kartaa inaad jawaabta su'aalaha ku bixiso waraaq haddii aad rabto.

Waxa lagugu casuumi doonnaa inaad kulan dhijitaal ah la yeelato Machadka Caafimaadka Dadweynaha marka la bilaabayo daraasadda, halkaas oo aad fursad u heli doonto inaad weydiiso su'aalo ku saabsan daraasadda iyo macnaha ka qaybgalka. Isla markaana waxaad muddada ka warhaynta socoto aad wixii su'aalo ah u soo diri kartaa e-boos loogu talogalay daraasadda, waxaanad heli kartaa jawaab degdeg ah.

Waxa ilmahaaga laga codsan doonnaa in laga qaado tijaabo candhuuf ah marka la bilaabo (sida ugu dhakhsaha badan) iyo dhammaadka muddada ka warhaynta. Tijaabadu waxay ka koobantahay in candhuuf lagu tufo bekeeri/koob mana laha wax dhib ah. Waxaad heli doontaa qalabka qaadista tijaabada iyo tilmaamo ku saabsan qaabka loo qaadayo tijaabada, waxaana tijaabada lagu qaadi karaa guriga. Mid ka mid ah shaqaalaha daraasadda ayaa ka masuul ah in tijaabooyinka laga soo qaado gurigiina haddii ilmahaagu/adigu ku jirtaan karantiimo. Haddii adigu aanad ku jirin karantiimo waxaad dooran kartaa inaad tijaabada keento xannaanada ama iskuulka ilmahaaga ama laga soo donoo gurigiina xilli lagu balamay.

**Marka uu jiro xanuun daran**
Haddii ilmahaagu aad u xanuunsado oo aad rabto in dhakhtar uu eego, waxa muhiim ah inaad arrintaas u samayso si ka madaxbannaan daraasadda. Daraasaddan ha ka sugin wax la socosho ah oo ku saaban arrintaas.

## FAA'IDOOYINKA IYO DHIBAATOOYINKA KA IMAN KARA

Waxannu candhuufta tijaabada ah u baadhi doonaa sida ugu dhakhsaha badan si aannu u eegno in ilmahaagu qaaday fayrusta koroonada ee cusub isla markaana waxannu idin la wadaagi doonnaa jawaabta tijaabada marka ay diyaar noqoto. Taas oo macnaheedu yahay in haddii ilmahaagu u dhawaaday qof laga helay fayrusta, waxa idinku xilli hore ogaan doontaan in ilmahaagu sito fayrusta koroonada ah, ama waxa la idiin xaqiijin doonaa in isagu/iyadu qaadin fayrusta.

Haddii ilmahaagu qaado fayrusta koroonada iyadoo lagu jiro muddada daraasado soconayso ama xilli ka dambeeya, waxa isaga/iyada la siin doonaa daaweyn iyo ka warhayn la mid ah inta dadka kale helayaan iyadoo loo siinayo si ka madaxbannaan daraasadda. Adeegyada caafimaadka ee degmada ayaa ka masuul ah la socoshada/ka warhaynta dadka laga helo covid-19 iyo inay go'aan ka gaadhaan tallaabooyinka loo baahanyahay in la qaado. Adeegyada caafimaadka ee degmada ayaa qeexaya qofka lagu sheegayo inuu u dhawaaday qofka qaba xanuunka oo markaa la rabo inuu galo karantiimo (raadinta faafiyaha), iyo in loo baahanyahay in dad kale la siiyo macluumaad. Ka warhaynta ka imanaysa dhinaca daraasaddu waxay barbar soconaysaa caawimada uu ilmahaagu ka helayo adeegyada caafimaadka ee degmada, oo waxba ma ka beddelayso ka warhayntii laga helayey adeegyada caafimaadka ee degmada.

Ka qaybgalka ilmahaagu waxa uu keenayaa in Machadka Caafimaadka Dadweynuhu helo aqoon dheeraad ah oo saabsan xanuunka covid-19 iyo aqoon dheeraad ah oo ku saabsan doorka ay carruurtu ku leedahay faafinta fayrusta cusub ee koroonada ah.

Ka qaybgalka kuma jiraan daawayn ama hawlo caafimaad, marka laga reebo qaadista tijaabada oo keliya, mana keenayo wax dhib ah, halis caafimaad ama in loo baahdo caymis gaar ah.

## MAXAA LAGU SAMAYNAYAA TIJAABOOYINKA IYO MACLUUMAADKA LAGA HELO ILMAHAAGA?

Macluumaadka la diiwaangeliyo ee ku saabsan ilmahaaga waxa loo isticmaalaya keliya sida lagu sharraxay hoosta ujeedada daraasadda. Haddii wax lagu kordhinayo isticmaalka iyo muddada kaydinta waa in marka hore ogolaansho laga helo Guddi-Goboleedka Akhlaaqda Daraasadaha Cilmiyeed. Waxa aad xaq u leedahay in aad aragto macluumaadka laga diiwaangeliyey ilmahaaga iyo in laguu saxo haddii khalad ku jiro macluumaadka la diiwaangeliyey. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad ogaatid qaabka loo ilaalinayo amaanka macluumaadka.

Dhammaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga waxa loo maaraynayaa qaab sir ah oo waafaqsan xeerarka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed.

Magaca ilmaha iyo lambarka dhalashada ayaa lala diiwaangelin doonaa natiijada tijaabooyinka candhuufta. Marka la samaynayo baadhitaanka tijaabooyinka candhuufta (ka eegista fayrusta) oo keliya ayaa magaca iyo lambarka dhalashada lala diiwaangelinayaa natiijooyinka tijaabada (si la mid ah marka tijaabada lagu qaado xafiiska dhakhtarka ee caadiga ah), maadaama covid-19 yahay xanuun ay waajib tahay in la sheego. Waxannu kaa codsanaynaa inaad noo ogolaato in natiijada ka soo baxda tijaabada fayrusta ee laga qaado ilmahaaga lagu xidho natiijooyinka laga diiwaangeliyey Nidaamka Ogeysiinta Cudurrada Infekshanka ah (MSIS). Ujeedada isku xidhka ayaa ah in la hubiyo tayada xogta daraasadaha cilmiyeed ee aannu haysano. Marka la samaynayo isku xidhka noocaas ah waxa la isticmaalayaa lambarka dhalashada.

Marka dambe ee laga sii shaqaynayo tijaabooyinka iyo macluumaadka ku saaban ilmahaaga, waxa macluumaadka lagu garan karo qofka (sida magaca iyo lambarka dhalashada) lagu beddelayaa fure aqoonsi ah. Arrinta waxa loo yaqaana sumad-tirista macluumaadka. In aad u yar oo ka mid ah shaqaalaha daraasadda ayaa heli karta xidhiidhka ka dhexeeya furahaas iyo macluumaadka shakhsiyeed ee ilmahaaga. Cilmi-baadheyaashu waxay arki karaan keliya macluumaadka lagu sameeyey sumad-tiris. Maamulaha daraasadda ayaa ka masuul

ah in macluumaadka ku saabsan ilmahaaga loo maareeyo qaab amaan ah.  Suurtagal ma noqon doonto in natiijada daraasadda ka soo baxda lagu garto dadka ka qaybgalay marka la soo saaro xogta.

Tijaabooyinka laga qaadayo ilmahaaga waxa lagu kaydin doono baanka macluumaadka daraasadda «Carruurta Koroonada» oo yaala Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Masuulka baanka xogtu waa maamulaha daraasadda Brita Askeland Winje oo ka tirsan Machadka Caafimaadka Dadweynaha.

Macluumaadka ku saabsan ilmahaaga waxa la kaydinayaa shan sanno kadib marka ay daraasaddu dhammaato sababtoo ah arrimaha dib u hubsashada. Gunaanadka daraasadda waxa loo cayimay inay noqoto 31-ka desember 2025, laakiin waa la kordhin karaa, waa haddii ogolaansho laga helo Guddi-Goboleedka Akhlaaqda Daraasadaha Cilmiyeed ee ku saabsan Caafimaadka (REK).

## KA QAYBGALKU MAAHA QASAB ISLA MARKAANA WAA LAGA NOQON KARAA OGOLAANSHAHA

Ka qaybgalka daraasada ee ilmahaagu maaha qasab. Markasta adiga oo aan sheegin wax sabab ah ayaad ka laaban kartaa ogolaanshaha ilmahaaga. Wax dhib ah ma ku keeni doonto ilmahaaga ama ka warhaynta ama daawaynta uu helayo haddii aad diido in ilmahaagu ka qaybgalo ama aad marka dambe doorato inaad ka laabato ogolaanshaha. Haddii aad ka laabato ogolaanshaha ilmahaaga, waa la joojin doonaa cilmi-baadhista lagu samaynayo macluumaadka caafimaadka ee ilmahaaga isla markaana waxa la burburinayaa tijaabooyinkii laga qaaday. Haddii aad ka laabato ogolaanshaha waxaad codsan kartaa in la tirtiro natiijada tijaabooyinka la qaaday iyo macluumaadka ku saabsan ilmaha, waa haddii aan macluumaadka lagu darin faallooyin ama aanay ku jirin qoraallo cilmiyeed.  Haddii aad mar dambe rabto inaad ka laabato ogolaanshaha ilmahaaga ama aad qabto su'aalo ku saabsan daraasadda, waxa aad la xidhiidhi kartaa e-boosta ama telefoonka maamulaha daraasadda.

Cabasho ayaad ka soo gudbin kartaa qaabka loo maareeyey macluumaadka ilmahaaga oo waxaad u gudbin kartaa Hay'adda ilaalinta macluumaadka Shakhsiga iyo Kormeeraha maamulka macluumaadka shakhsiga ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha.

## OGOLAANSHO

Guddi-Goboleedka Akhlaaqda Daraasadaha Cilmiyeed ee ku saabsan Caafimaadka ayaa qiimaysay daraasadda isla markaana ogolaatay daraasadda [REK SørØst A, 151649]

Marka la eego xeerka cusub ee macluumaadka shakhsiga waxa hay'adda masuulka ka ah maareynta oo ah Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo maamulaha daraasadda Brita Askeland Winje saaran masuuliyad kala gooni ah oo ku saabsan inay hubsadaan in maamulka macluumaadka ilmahaagu ku tiirsanyahay sabab sharci ah. Sharcinimadda daraasadani waxa ay ku salaysantahay xeerka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed ee Midowga Yurub juska 6 lr 1a iyo juska 9 lr 2a iyo ogolaanshaha aad bixiso.

Maacluumaadka waxannu u maamuli doonna si ku salaysan ogolaanshahaaga

## MA QABTAA SU'AALO KU SAABSAN DARAASADDA AMA KA QAYBGALKA?

Isticmaal e-boosta koronabarn@fhi.no

Waxaad macluumaadka daraasadda ka heli kartaa bogga internetka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha: www.fhi.no/studier/koronabarn . Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan ilaalinta macluumaad shakhsiga iyo amaanka xogta waxaad xidhiidh la samaysaa kormeeraha ilaalinta macluumaadka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha oo leh e-boos: personvernombud@fhi.no. Sida kalena Hay'adda Ilaalinta Macluumaadka Shakhsiga ayaad kala xidhiidhi doontaa postkasse@datatilsynet.no .

## WAAN OGOLAHAY IN ILMAHAYGU KA QAYBGALO DARAASADDA IYO IN MACLUUMAADKA ILMAHA IYO TIJAABADA LA QAADAY LOO ISTICMAALO SIDA LA SOO SHEEGAY

Annagoo ah waalidka _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ (Magac buuxa) waxannu ogolnahay in iyada/isagu ka qaybgalo daraasadda.

Lambarka dhalashada ee ilmaha (11 lambar):

Waa in labada waalid ba ogolaadaan si ilmuhu uga qaybgeli karo

☐ Isu-talaab saar halkan haddii aad keligaa leedahay masuuliyadda waalidnimo ee ilmaha

| | |
|---|---|
| Goob iyo taariikh | |
| | |
| Saxeexa waalidka 1-aad | Magaca waalidka 1-aad oo ku qoran xuruuf isku jirin |

| | |
|---|---|
| Goob iyo taariikh | Saxeexa waalidka 2-aad |
| | |
| Saxeexa waalidka 2-aad | Magaca waalidka 3-aad oo ku qoran xuruuf isku jirin |